# Ka-dhaafitaanka Caymiska Medicaid ee Oregon

## Waa maxay ka-dhaafitaanka caymiska Medicaid?

Gobolku waa inuu codsado **ka-dhaafitaanka** caymiska Medicaid markuu rabo inuu wax ka beddelo tilmaamaha caadiga ah. Gobolku wuxuu ka codsan karaa dawladda dhexe ka-dhaafitaankan. Gobolku wuxuu codsan karaa in laga dhaafo xeerar gaar ah si loo helo dabacsanaan ballaaran oo ku xeeran waxyaabaha soo socda iyo waxyaabo badan:

- Yaa u-qalma caymiska Medicaid
- Waa maxay macaashyada ay helaan
- Sida daryeelka caafimaadka loo siiyo xubnaha ku jira caymiska Medicaid

Oregon waxay codsan doontaa ka-dhaafitaan cusub oo loogu talagalay sannadaha 2022 ilaa 2027. Ina lagu jiro 2021, si loo sii wado isbeddelka lagu sameynayo barnaamijka Medicaid ee Oregon, oo sidoo kale loo yaqaano Qorshaha Caafimaadka Oregon (OHP) Maamulka Caafimaadka Oregon (OHA) ayaa dhisaya aragtida, hadafyada, xeeladaha iyo codsiga.

## Ka-dhaafitaanadii hore ee Oregon

Dawladda dhexe sida caadiga ah waxay ansixisaa ka-dhaafitaano dhawr sanno ah markiiba. Ka-dhaafitaanada caymiska Medicaid ee Oregon waa la cusbooneysiiyay waana la ballaariyey marar badan tan iyo 1994-kii:

- Ka-dhaafitaanka asalka ahaa ee 1994-kii ayaa aasaas u ahaa Qorshaha Caafimaadka Oregon (OHP). Ka-dhaafitaankan wuxuu ballaariyay u-qalmitaanka iyo macaashyada.
- Dib-u-cusboonaysiinta ka-dhaafitaankii 2012 wuxuu aasaas u ahaa ururrada daryeelka isku-dubbaridan (CCOs). CCO-yada waa ururro deegaameed oo bixiya lacagta daryeelka caafimaadka.
- Dib-u-cusboonaysiinta ka-dhaafitaankii 2017 ayaa wuxuu dhisay oo wanaajiyay qaabka ururka daryeelka isku-dubbaridan (CCO).

## Mustaqbalka

Ka-dhaafitaanka 2022-2027 wuxuu ka shaqeyn doonaa inuu sii dhiso taariikhda xooggan ee hal-abuurka Oregon ee daryeelka caafimaadka wuxuuna sameyn doonaa horusocod ku wajahan:

- Abuurida nidaam daryeel caafimaad oo xaqsoor leh, oo dhaqan ahaan iyo luuqad ahaanba degdegsiimo u leh

### Waa maxay caymiska Medicaid?

**Qorshaha Caafimaadka Oregon (OHP) waa Barnaamijka Medicaid ee Oregon.**

Medicaid waa barnaamij dawladeed oo uu maareeyo gobol kasta. Dawladda dhexe waxay gacan ka geysataa bixinta lacagta barnaamijka.

Sharciga Dawladda:

- Wuxuu jaangooyaa sida barnaamijku u shaqeeyo.
- Wuxuu dejiyaa heerarka ugu hooseeya ee u-qalmitaanka Medicaid.
- Wuxuu dejiyaa macaashyada loo baahan yahay.

Gudaha Oregon, Medicaid, oo loo yaqaano Qorshaha Caafimaadka Oregon (OHP), wuxuu siiyaa caymis caafimaad qiyaastii afartii qofba mid ka mid ah ee ku nool Oregon oo ka kala tirsan dhammaan qaybaha kala duwan ee bulshada.

- Gacan ka geysashada yareynta kharashaadka iyadoo la bixinayo daryeel caafimaad oo tayo leh
- Maalgelinta daryeel caafimaad oo xaqsoor leh oo dhaqan ahaan habboon, iyo
- Hubinta in qof walba heli karo caymiska uu u baahan yahay.

## Waxaan rabnaa inaan fikradaada maqalno!

Barnaamij guud ahaan, Qorshaha Caafimaadka Oregon (OHP) annagaa oo dhan ayaa iska leh. Maadaama Maamulka Caafimaadka Oregon (OHA) ay u baahan yihiin fikirkaaga si loo hubiyo in aragtida ka-dhaafitaanka ay ka turjumeyso baahiyaha bulshada iyo daneeyayaasha. Waxaan soo dhaweyneynaa fikradaada ku saabsan sida looga dhigi karo Qorshaha Caafimaadka Oregon (OHP) mid wax-ku-ool u ah qof kasta oo ka shaqeeya gobolkayaga. Fadlan maanka ku hay, si kastaba ha ahaatee, inay jiraan xaddidaado la saaro noocyada isbeddellada ay Maamulka Caafimaadka Oregon (OHA) ay soojeedin karaan.

Maamulka Caafimaadka Oregon (OHA) waxay raadinayaan fikrada dadweynaha si ay gacan uga geystaan qaabaynta waxa uu ka kooban yahay codsigayaga dib-u-cusboonaysiinta ka-dhaafitaanka. **Dadweynaha waxaa lagu martiqaaday inay fikir ka dhiibtaan waxa lagu darayo codsiga ka-dhaafitaanka ee qabyada ah ilaa bilowga Janaayo, 2022.** Dabayaaqada sannadkan, waxaan ku warsan doonaa inaad faallo ka bixiso codsiga laftiisa. Ka ogow wax badan oo ku saabsan sida loo soo gudbiyo faallooyinka barta Oregon.gov/1115WaiverRenewal. Ama waxaad faallooyinkaaga ku soo diri kartaa iimaylka 1115Wiver.Renewal@dhsoha.state.or.us.

# Ka-dhaafitaanka Caymiska Medicaid ee Oregon

## Jadwalka

| | |
|---|---|
| **Deyrta 2021** | Dadweynaha waxaa lagu martiqaaday inay fikrad ka dhiibtaan wuxuu ka koobnaan doono codsiga ka-dhaafitaanka ee qabyada ah ilaa dhammaadka 2021. |
| **Disembar 2021** | Codsiga dib-u-cusboonaysiinta ee qabyo-qoraalka ah ayaa la gelin doonaa doonaa bogga mareegta ee Dib-u-cusboonaysiinta Ka-dhaafitaanka barta Oregon.gov/1115WaiverRenewal. |
| **Bilowga Janaayo 2022** | Waqtiga kamadambaysta ah ee la soo gudbinayo faallooyinka dadweynaha ee codsiga ka-dhaafitaanka. Ka akhri wax badan oo ku saabsan geedi-socodka bata Oregon.gov/1115WaiverRenewal. |
| **Febraayo 2022** | Maamulka Caafimaadka Oregon (OHA) waxay u gudbiyaan codsiga dib-u-cusboonaysiinta Xarumaha Adeegyada Medicare iyo Medicaid (CMS). Codsiga kamadambeysta ah waxaa la gelin doonaa mareegta Maamulka Caafimaadka Oregon (OHA). |

Haddii la ansixiyo, dib-u-cusboonaysiinta ka-dhaafitaanka waxay dhaqangeli doontaa dhammaadka xagaaga 2022.

Waxaad ku heli kartaa dukumintigaan luuqado kale, daabacaad weyn, qoraalka indhoolayaasha ama qaabka aad jeceshahay. Kala xiriir Community Partner Outreach Program community. outreach@dhsoha.state.or.us ama adigoo wacaya 1-833-647-3678. Waxaan aqbalnaa dhammaan wicitaanada dadka hadalka dhibayo ama waxaad wici kartaa 711.

OHP 3708 SOMALI (10/07/2021)